

**TILMAAMO – KA-DHAAFIDDA KHIDMADDA IYO KHARASHKA MAXKAMADDA
(IN FORMA PAUPERIS)
Xeerarka Minnesota \$ 563.01**

Haddii aadan awoodin inaad iska bixiso khidmadaha maxkamadda iyo kharashaadka, waxaa laga yaabaa in lagaa khidmadaha iyo kharashyada. Sharci ahaan, maxkamaddu way kaa dhaafi kartaa khidmadaha iyo kharashyadan haddii:

1. Aad qaadanayso caawinaada dadweynaha ee hoos timaad mid ama in ka badan barnaamijyadan soo socda:
Qorshaha Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (MFIP). Gargaarka degdegga ah ee MFIP, ama Gargaarka Kala-duwanaanshaha ee MFIP; Gargaarka Guud ama Gargaarka Guud ee Degdegga ah; Gargaarka Caafimaadka ama Gargaarka Caafimaadka Guud; Boonada Raashinka; Dakhliga Soshiyal Sekuyurati ee Dheeraadka ah; Gargaarka Dheeraadka ah ee Minnesota (MSA) ama Gargaarka Degdegga ah ee MSA; Kaalmada Tamarta.

AMA

2. Uu ku metelayo adeeg sharci ama qareen mutadawac ah oo ka wakiil ah barnaamijka adeegyada sharciga madaniga ah ama barnaamijka qareenka mutadawaca ah taasoo ku salaysan saboolnimo.

AMA

3. Dakhliga qoyskaaga soo gala sannadkii kahor canshuurta uu kayar yahay 125% Tilmaamaha Faqriga ee Federaalka (Tirooyinka 2021) ee tirada qoyskaaga sida hoos lagu muujiyey.

Heerka Dakhliga ugu Badan- 125% ee Saboolnimada

Fadlan calaamadee tirada qoyskaaga	Tirada Unugga Qoyska	Dakhliga Qoyska ee Sannadkii Cashuurta Kahor	Dakhliga Qoyska ee Bishii Cashuurta Kahor	Dakhliga Qoyska ee Toddobaadkii Cashuurta Kahor
	1	\$ 16,100	\$ 1,342	\$ 310
	2	\$ 21,775	\$ 1,815	\$ 419
	3	\$ 27,450	\$ 2,288	\$ 528

	4	\$ 33,125	\$ 2,760	\$ 637
	5	\$ 38,800	\$ 3,233	\$ 746
	6	\$ 44,475	\$ 3,706	\$ 855
	7	\$ 50,150	\$ 4,179	\$ 964
	8	\$ 55,825	\$ 4,652	\$ 1,074

In ka badan 8 xubnood, ku dar \$5675 sannadkii xubin qoys oo kasta oo soo biirta (ama \$473 bishii ama \$109 toddobaadkii)

Tirada xubnaha qoyska: _____ Xisaabi oo ku qor tirada halkaan: \$ _____

AMA

4. Dakhligaaga kuma filna inaad ku bixiso baahiyaha guud ee nolosha naftaada iyo dadka aad masruuftid iyo sidoo kale inaad bixiso khidmadaha maxkamadda iyo kharashyada.

Haddii aad aaminsan tahay inaad buuxinayso mid ka mid ah qaybaha kore, waxaad codsan kartaa si aad horay ugu sii socotid In Forma Pauperis (cinwaan Laatiin ah oo loo adeegsado qeexidda nidaamka ka-dhaafidda khidmadaha iyo kharashyada maxkamadda).

TALLAABADA 1AAD: Buuxi warqadda *Dhaarta ee loogu gudbayo In Forma Pauperis*. Saxeex *Dhaarta Loogu sii Gudbayo In Forma Pauperis* ee hoos timaad ciqaabaha iyo been abuurka. Tan macnaheedu waxa weeye waxaad sheegaysaa in macluumaadka ku jira *dhaarta* ay run yihiin inta aad ka ogtahay. Been sheegiddu waa dambi ah in si ula kac ah been loo sheego ama been looga sheego runta, ciqaabteeduna tahay xabsi ama ciqaab kale. Hubso inaad ku lifaaqdo nuqullada dukumiintiyada lagaa codsaday foomka, sida caddeynta kaalmada dadweynaha, iwm.

TALLAABADA 2AAD: U gudbi dukumiintiyadan maamulaha maxkamadda isla maxkamadda aad ka xaraynaysid codsigaaga (marka laga hadlayo codsiga cashuurta hantida) ama ogaysiiska rafcaanka (marka laga hadlayo rafcaan ka socda amarka gudoomiyaha dakhliga). Qofka shaqaalaha ah ayaa kuu sheegi doona qaabsocodka garsooraha dibu-eegaya codsigaaga.

Haddii garsooruhu uu ogolaado codsigaaga in lagaa dhaafo khidmadaha iyo/ama kharashyada, amarku wuxuu khuseyn doonaa oo keliya kiiska maxkamadda ee ku qoran cinwaanka amarka *In Forma Pauperis* (IFP). Amarka IFP wuxuu ku dhacayaa hal sano laga bilaabo taariikhda amarka. Maxkamaddu waxay beddeli kartaa ama wax ka beddeli kartaa amarka wakhti kasta kahor intaanu amarku dhicin. Haddii tallaabada maxkamadda aan la xallin kahor taariikhda dhicitaanka ee amarka IFP iyo khidmadaha kale ama kharashyada loo baahan yahay in la bixiyo,

Bogga 2aad

waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso mid kale oo ah *Dhaarta In Forma Pauperis*.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid oo aadan awoodin qareen, waxaad jeclaan kartaa inaad la tashato xafiiska gargaarka sharciga, xafiiska adeegyada sharciga, ama adeegga gudbinta qareenka ee degmadaada (oo ku qoran bogagga jaalaha ah ee hoosta "Qareennada"), ama adigoo booqanaya www.lawhelpmn.org.

Waxyaabaha waxtarka leh waxaa laga heli karaa maktabadaada sharciga ee degmada deegaanka. Tilmaan ahaan eeg <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp>. Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir maamulka maxkamadda cashuurta ama wac Maktabadda Sharciga ee Gobolka Minnesota telefoonka 651-297-7651.